



**Sanduuqa
Maaliyada Dariska
(Neighborhood Matching Fund)**

TUSMOOYINKA 2017

Sanduuqa Maaliyada Dariska waa dhaqaale ku saleysan fikrad sahlan. Waxeyna xoojineysaa xiriirka iyo iskaashiga magaalada iyo bulshada.



Seattle
Neighborhoods
NEIGHBORHOOD MATCHING FUND



Ku Saabsan Anaga

Sanduuqa Maaliyada Dariska (SMD) waxaa la abuuray 1988 in ay u bixiso kheyraadka magaalada, si loo caawimo bulshadeenu in ay aad isgu xirnaato oo xogeysato. Muddo sanado ah, waxaanu maalginey in ka badan 5,000 oo mashriic guud ee magaalada Seattle. Abaalmarinta maaliyad kasta, waxaa lagu aadiyaa oo u dhigantaa shaqaalaha iskaa wax u qabso ku shaqeynaya, qalabka deeq lagu bixiyo, ugu deeqida adeegyada xirfadaha, iyo lacagta caddaanka ah.

SMD waa dhaqaale ku saleysan fikrad sahlan. Waxeyna xoojineysaa iskaashiga magaalada iyo bulshada.



Maxaanu Maalgelinnaa

Waxaanu maal-galinaa tiro badan oo kale nooca ah oo hal abuur u leh bulshada mashaariicada buuxisa shuruudaha soo socda:

- Ka qayb-qaadashada xubnaha bulshada curinta iyo dhameystirka mashruuc.
- Abuura hagaajin bulsho.
- Xor ah oo u furan dhammaan xubnaha dadweynaha.
- U muuqda inuu diyaar u yahay in la bilaabo inta u dhaxeeya 1-2 bilood laga bilaabo taariikhda abaalmarinta la bixinayo.
- Muujinta iyo bulshada kaalin ka geysan karto.
- Inuu ka dhacdo gudaha magaalada Seattle.
- Isu imaatanka bulshada 2dii sano ee kasta



Yaa ku habboon in uu codsado?

Waxaanu dhiirigelineynaa arajiyada ka timaada kooxaha dariska ah, ururrada bulshada, kooxaha aan rasmi ahayn, iyo kooxaha ganacstada kuwaas oo doonaya in ay sameeyaan mashruuc si ay u dhisaan xiriir xoogan oo ay bulshadu yeelato.



Dhammaan kooxaha codsadanaya waa in ay ahaadaan kuwa furan oo loo dhan yahay, si firfircooni ahna uga qayb galaan xubnaha bulshada kala duwan, oo si weyn uga kooban dadka ku nool iyo / ama ka shaqeeya Seattle.



Kuwan soo socda waa labada lacagood ee ka mida Sanduuqa Maaliyada Dariska:

	Dhibic yar oo Dhaqaale ah	Iskaashiga dhaqaale ee bulshada
Abaalmarin	Ugu badnaa \$5,000	Ugu badnaan \$100,000
Mudada kama dambeysta codsiga la qabanyo	Waxaa la aqbalayaa in la soo gudbiyaa ugu yaraan lix todobaad ka hor tariikhada mashruuca la bilaabay.	Maarso 27, 2017 Juun 26, 2017 Sabtember 25, 2017
Ku wargelinta go'aanka	Laba usbuuc gudahood	Lix usbuuc gudahood
Heshiisyada	Laba usbuuc gudahood laga bilaabo maalinta abaalmarinta	Afar usbuuc gudahood laga bilaabo maalinta abaalmarinta

Tilabooyinka Araajida



Marxalada Eegista Codsiga

Dhammaan codsiyada waxaa dib u eegaya shaqaalaha barnaamijka dhaqaalaha ee dariseynta (Neighborhood Matching Fund program staff), haddii loo baahdo, waxaa kala soocaya waaxda magaalada ay khuseyso.

Codsiyada waxaa lagu qiimeeynayaa nidaamka dhibcaha ah, sida dhisida iskaashiga bulshada (50 dhibcood) iyo u diyaar ahaanshaaha mashruuca (50 dhibcood).

Mashaariicda ku lug leh horumarinta hantida ay leeyihiin hay'adaha dadweynaha ama kuwa gaarka, waxaa loo baahanyahay ogolaashaha milkiilaha mashruuca in la soo raaciyo codsiga.

Si loo horumariyo hantida maguurtada ee magaalada, Waaxda Magaalada ee ku haboon waxey bixin doontaa fasax inta lagu guda jiro dib u eegista arajiyada.

Qeybaha Kharashka

Kharashka waa in uu si toos xiriir ula leeyahay mashruuca waana in uu ka mid yahay afarta qaybood ee soo socda:



SHAQAALAHA

Kharashyada la xiriira shaqaalaha iyo kuwa tabaranaya ee maamuli doona mashruuca.

Kharashka maamulka mashruuca waxuu ku xadidan yahay boqolkiiba 10 tirada guud ee abaalmarinta mashruuca.



ADEEGYADA XIRFADLAYAASH

Kharashyada la xiriira la taliyayaasha, waratada, fanaaniinta, iyo adeegyada.



AGABKA IYO ALAABAHA

Kharashyada la xiriira qalabka loo baahan yahay si ay u dhamaystiraan mashruuca.

Kharashka Cuntada waxuu ku xadidan yahay 20% abaalmarinta, laakiin kama badanaan karo \$5,000 halkii mashruucba.



DHISMAMA IYO RAASUMAALKA

Kharashyada la xiriira dhismaha iyo dayactirka jardiinooyinka beeraha, goobaha dhismayaalka, iyo goobaha kale ee dadweynaha.

Taburraca Bulshada

Waxaa saldhig u ah bixinta dhaqaalaha in ay bulshadu la timaado dhaqaale ama tabarruc u dhigma hantida la dalbaday.

- Qayb muhiim ka ah dhaqaalaha la bixinayo waa in ay ka timadaa bulshada codsaneysa ee mashruuca saameyn ku yeelan doono.
- Wadarta guud ee lacagta lala imaanayo waa in ay la'eg tahay ugu yaraan nus lacagta uu deeq-lacageedku warsanyo (1/2 barbar: 1kii codsi deeq-).
- Kheyraadka Magaalada Seattle sida shaqaalaha magaalada wakhtigooda, isticmaalka goobaha ama dhismayaasha magaalada, iyo /ama maaliyad kasta lagama yaabo in loo xisaabiyo adeeg u dhigma.
- Qof shakhsiga ama ganacsatada lacagta deeqda la siiyey, waa laga yaabaa in sidoo kale aan laga soo qaadin in ay la yimadeenn tabarruc.

Qeybaha u dhigma

Waxaa jira afar nooc oo u qalma tabarruca oo buuxinaya una dhigma sharuudaha:



WAKHTIGA TABARUCAADA

Shaqsiaadka waxey wakhtigooda mashruuca gelin karaan siyaabo kala duwan: sida u adeegida guddiga qorshaynta, ka qeyb galka xafladaha, kor u qaadida mashruuca, iyo waxyaabe kale oo badan. waqti tabrucida waxuu qiimahiisu yahay \$20 / saacadiiba.

Wakhtiga tabaruca waxaa laga yaabaa in laga bilaabo taariikhda soo gudbinta codsiga ku egyahay.



LACAGTA CADAANKA AH

Tabarucaadka lacagta cadaan ka ah ee shakhsiaad, ganacsatada, ururada, ama barnaamijyo kale ee deeqda waxaa suurtoowda in lagu tirin karaa lacagta lala imaanayo. Deeqahaasu waa in uu xaqiijiyey deeq bixiyahu ama fahfaahiyaa qorshaha la xiriira ururinta lacagta.



DEEQAHA ADEEGYADA XIRFADLAYAALKA

Xirfadlayaasha waxey ku deeqi karaan adeegyada mashruuca xiriirka la leh, ilaa ugu badnaan \$100 / saacadiiba. Adeegyadan waa inuu soo xaqiijiyaa deeqbixiyaha.



KU DEEQISTA QALABKA IYO AQABKA

Dhammaan agabka iyo alaabada lagu deeqo waxaa lagu qiimeeynayaa qiimaha tafaariiqda ama lacagta kirada caadiga ah. Deeqahaasu waa in uu xaqiijiyaa deeqbixiyahu.